STAY SAFE MN

Hagaha Ku Noqoshada Qoyska ee Iskuulada

09/01/2021

Wax ku barashada qof ahaan ayaa waxay muhiim u tahay fayo-qabka ardaydeena iyo guusha tacliimeed. Sannad dugsiyeed kale oo uu saameeyay COVID-19, iskuuladeena, ardayda, qoysaska iyo bulshooyinkeena waxaa laga codsanayaa inay qaadaan tallaabooyin lagu ilaalinayo caafimaadka iyo badbaadada dadka oo dhan.

Laga bilaabo Luulyo 1, 2021, xaaladda deg-dega ah ee xilliga nabada ee Minnesota oo ay ku jirto Qorshaha Waxbarasho ee Ammaanka ah — ayaa dhammaatay taas darteedna, go'aanada sannad-dugsiyeedka 2021-22 waa in lagu sameeyaa heer maxalli ah.

Tan micnaheedu waa in Gobolka Minnesota uusan ka dalban karin iskuulada inay hirgeliyaan taxaddarro caafimaad iyo ammaanka oo dheeri ah ama in ay bixiyaan ikhtiyaar waxbarasho masaafada ah. Waaxda Caafimaadka ee Minnesota (MDH) ayaa bixisay Talooyin Ku Saabsan Habdhaqanka Ugu Wanaagsan si ay uga caawiso guddiyada iskuulada maxalliga ah iyo hoggaamiyeyaasha iskuullada inay dejiyaan qorshayaal lagu ilaalinayo caafimaadka iyo ammaanka ardayda, shaqaalaha iyo qoysaska. Waaxda Waxbarashada ee Minnesota (MDE) ayaa sidoo kale u hab samaysay1 iskuulada si ay u siiyaan ikhtiyaar waxbarasho oo khadka internetka ah ama isku dhafan qoysaska laga yaabo in aysan ku qanacsanayn ku soo noqoshada fasalka.

Tilmaamahan waxaa loo abuuray inay u noqoto xog kooban oo loogu talagalay qoysaska marka ay go'aaminayaan inta lagu jiro sannad dugsiyeedka 2021-22 waxaana ku jira macluumaad ku saabsan hagida caafimaadka ee Minnesota, ikhtiyaarada wax ku barashada internetka iyo cuntooyinka iskuulka. Waxaa la soo cusboonaysiin doonaa markii loo baahdo.

Tilmaamaha Caafimaadka

Iyada oo ay la socdaan ardayda, qoysaska iyo barayaasha K-12 oo isu diyaarinaya bilowga sannad dugsiyeedka 2021-22 iyada oo ay jiraan walaacyo ku saabsan kor u kaca kiisaska COVID-19 oo ay keentay nooca Delta, saraakiisha caafimaadku waxay ku talinayaan in iskuuladu raacaan tilmaamaha CDC ee loogu talagalay ka hortaga COVID-19 ee gudaha K-12 sannadkan. Bulshooyinka iskuulada ee maxalliga ah ayaa waxay u adeegsan doonaan tilmaamaha si ay u farsameeyaan qorshayaasha maxalliga ah iyo xeerarka taageeraya baahiyaha bulshooyinkooda.

Xeeladaha kahortagga COVID-19 ee firfircoon ayaa weli muhiim u ah ka badbaadinta dadka oo ay ku jiraan ardayda, macallimiinta, iyo shaqaalaha aan si buuxda loo tallaalin ama leh xaaladaha caafimaadka qaarkood.

Dukumintiga hagida, Talooyinka Tababbarka ugu Wanaagsan ee ka Hortaga COVID-19 ee Iskuulada ee Sannad-dugsiyeedka 2021-22 (PDF) ayaa iftiiminaya talooyinka ugu habboon ee CDC ee hirgelinta xeeladaha ka hortagga lakabyada ah (iyadoo la wada adeegsanayo xeelado badan oo ka hortag ah si joogto ah) si loo ilaaliyo dadka aan si buuxda loo tallaalin .

Waxaa ka mid ah qodobbada muhiimka ah ee ku jira tilmaamaha:

TALLAALADA

- Dhammaan dadka jira 12 sano iyo ka weyn waa inay iska tallaalaan COVID-19 ka hor inta aysan qof ahaan ugu noqon iskuulka, isboortiga, ama waxqabadyada kale si loo badbaadiyo naftooda iyo dadka ku xeeran ee aan la tallaali karin. La hadal bixiye daryeel caafimaad ama Raadi Goobaha Tallaalka ee kuugu dhow.

MAASKARO XIRASHADA

- Dhammaan ardayda, macallimiinta, shaqaalaha, iyo dadka soo booqanaya (da'da 2 sano iyo ka weyn) dhismayaasha iskuulku waa inay xirtaan maaskaro gudaha dhismaha iyadoon loo eegin xaalada tallaalka.

KALA FOGAANSHAHA BULSHADA

- Iskuuladu waa inay joogteeyaan ugu yaraan 3 fiid oo masaafo jir ahaan ah in ay u dhexayso ardayda fasallada dhexdooda mar kasta oo ay suurtogaltahay. Marka aysan suurtogal ahayn in la ilaaliyo masaafada 3 fiid ah oo u dhaxaysa ardayda, waxaa si gaar ah muhiim u ah in lakabyo loo sameeyo xeeladaha kale ee ka hortaga. Dadka qaangaarka ah ee ku dhex jira dhismayaasha iskuulku waa inay ilaaliyaan in ay isu jirsadaan 6 fiid oo masaafo jireed ah midba midka kale iyo ardayda mar kasta oo ay suurtogaltahay.

JOOGISTA GURIGA MARKA LA XANUUNSADO

- Ardayda, macallimiinta, iyo shaqaaluhu waa inay guriga joogaan haddii ay xanuun dareemaan waana inay la xiriiraan bixiyaha daryeelka caafimaadka si loo baaro loona daryeelo.

KARANTIILKA

- Ardayda, macallimiinta, iyo shaqaalaha **aan si buuxda loo tallaalin** waxay u baahanyihiin inay guriga joogaan oo ay ka fogaadaan dadka kale haddii ay xiriir dhow la yeesheen kiis la xaqiijiyay. Karantiil 14 maalmood ah ayaa ah talada ugu nabdoon, laakiin ikhtiyaarka karantiilka oo gaaban ayaa la tixgelin karaa marka ay habboontahay.
- Ardayda, macallimiinta, iyo shaqaalaha **si buuxda loo tallaalay** uma baahna inay guryahooda joogaan xitaa haddii ay dhowaan xiriir dhow la yeesheen kiis la xaqiijiyay ilaa inta aysan muujinaynin astaamo oo aan cudurkana laga helin.

- Waa in ay raacaan tilmaamaha baaritaanka CDC ee loogu talagalay qof kasta oo u faydmay kiis la xaqiijiyay.

BAARINTAANKA

- Dadka aan si buuxda loo tallaalin ee qof ahaan ugu soo noqonaya iskuulka, isboortiga, ama nashaadaadka manhajka ka baxsan (iyo qoysaskoodu) waa inay si joogto ah iskaga baaraan COVID-19 sida ay qabaan tilmaamaha CDC.
- Iskuulada waxaa lagu dhiirigelinayaa inay abuuraan barnaamijyo baaritaanka COVID-19 oo maxalli ah, gobolkuna wuxuu bixiyay lacag si taas loo sameeyo.
- Qoysasku waxaa kale oo dalban karaan baaritaanka guriga dhexdiisa ah oo lacag la'aan ah ama waxay heli karaan goob lagu bixiyo baaritaan kharash la'aan ah.

TALLAABOOYINKA YARAYNTA DHIBAATOOYINKA OO DHEERAAD AH

- Iskuuladu waa inay dhiirrigeliyaan howgeliyaha/laydhinta, raadinta xiriirka oo ay weheliso go'doominta iyo karantiilka, gacmo dhaqasho, hab dhaqanka neefsashada, nadiifinta, iyo jeermis kadilista oo ah lakabyada ka hortaga ee muhiimka ah.

Wax ku Barashada Internetka

Iskuulada loogama baahna inay bixiyaan ikhtiyaarka wax ku barashada masaafada sannad -dugsiyeedkan sababta oo ah amarrada fulinta ee looga baahnaa iskuulada inay bixiyaan ikhtiyaarka wax ku barashada masaafada ayaa la joogiyey markii ay dhammaatay xaaladda deg dega ah ee xilliga nabada ee gobolku. Tan daraadeed, MDE waxay u samaysay hab dhakhso ah oo ay iskuuladu ku bixiyaan wax ku barashada internetka iyo isku-dhafka sanad dugsiyeedka 2021-22. Ikhtiyaarkani wuxuu u ogolaanayaa degmooyinku inay qoysaska siiyaan wax ku barashada khadka internetka sannadka oo dhan dadka laga yaabo inay doorbidaan ikhtiyaar lagu xiriirayo kombiyuurka iyo sidoo kale u ogolaanaya degmooyinku inay kaga jawaabaan aafada cudurka heer maxalli ah.

Haddii ay wax carqalad ah ku timaado waxbarashada qof ahaan loo aadayo sababtoo ah kiisaska COVID-19 ama xiriiro dhow, lahaanshaha dabacsanaanta ee heerka maxalliga ah si loogu wareego wax ku barashada internetka ayaa muhiim u noqon doonta hubinta joogtaynta waxbarashada ardayda. MDE waxay si xoog badan ugu dhiirrigelinaysaa degmooyinku inay codsadaan inay noqdaan ku bixiyeyaasha khadka internetka dhammaan heerarka fasalada loo adeego, laakiin degmooyinka/charter-ku waxay go'aamin doonaan macnaha iyo baahida deegaanka.

Haddii degmada iskuulkaaga ama iskuulkaaga charterku uusan bixin ikhtiyaarka waxbarashada internetka ah, liiska bixiyeyaasha wax ku barashada internetka ee la ogolaaday ayaa la heli karaa.

Cuntada Iskuulka

Tan iyo markii aafada cudurku ay bilaabatay bishii Maarso 2020, iskuuladu waxay siinayeen cunto dhammaan ardayda lacag la'aan iyada oo loo marayo barnaamijyada nafaqada carruurta ee Waaxda Beeraha ee Maraykanka. Inta lagu jiro sannad dugsiyeedka 2021-22, dhammaan iskuuladu waxay sii wadi karaan inay ardayda siiyaan cuntooyin lacag la'aan ah iyada oo loo marayo barnaamijka Seamless Summer Option (SSO). Wixii macluumaad dheeraad ah kala xiriir iskuulka ilmahaaga.

Waaxda Waxbarashada ee Minnesota | education.mn.gov | 651-582-8200
1500 Highway 36 West, Roseville, MN 55113

La xiriir mde.communications@state.mn.us si aad u codsato qaab kale.